

S. Waa maxay sababta ay u jiraan qiimenyo badan?

J. WAC 388-310-1450 wuxuu dhigayaa in waalidiinta ku jira Tubta Uurka ilaa Tubta Shaqaaleynta (Pregnancy to Employment Pathway) ay tahay in ay ka qaybgalaan qiimeynta takhasuslaha shaqaalaha bulshada ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshadada si loo go'aamiyo hawlaha sida ugu fiican uga soo baxa baahiyadaada. Qiimeynadan waxaa lagu sameynayaa goobo kala duwan ee ah uurka (marka waaxda ay oggaato in aad uu rleedahay ama aad ilmo leedahay oo da'diisu ka yar tahay hal iyo kadib dhalmada) si loo aqoonsado isbeddel kasta ee ku yimaado xaaladaha qoyskaaga iyo si loo hubiyo in hawlaha loo baahan yahay in ay wali habboon yihiin. Tusaale ahaan, baahiyadaada xilliga saddexda bilood ee saddexaad waxay aad uga duwanaa karaan baahiyadaada kadib marka ilmahaaga uu dhasho. Waxaan doonaynaa in aan habsado in shuruudahaaga WorkFirst ay sii-wadaan in ay buuxiyaan baahiyadaada.

S. Maxaa dhacaya haddii aan ka soo qaybgalin ballan qiimeyn?

J. Haddii aadan ka soo qaybgalin qiimeynta, waxaanu sii-wadeyaa hannaanka sababta wanaagsan si aan u qiimeynta haddii aad lahayd sabab wanaagsan oo aadan ugu qaybgaleyn ama haddii kale. Haddii aadan lahayn sabab wanaagsan, waa lagu cunaqabateynayaa gargaarkaaga kaashka ee Workfirst waa la yareynayaa.

S. Aniga miyaan ahayn qofka kaliya laga doonayo in uu ka qaybgalo qiimeynada?

J. Waalid kasta ee qaadanaya gargaarka kaashka ah ee TANF waa in uu ka qaybgalo qiimeyn lagu aqoonsanayo baahiyada qoyska. Shuruudaha ka qaybgalka WorkFirst waxay ku saleysnaayaan natijada qiimeyntan. Haddii labada waalidiinba ay guriga joogaan, waalidiinta midkood (balse ma aha labada) ayaa qaadan kara ka-reebnaanta ilmaha yar waqti kasta ee la sheega.

S. Sideen ku garanayaa haddii la joogo waqtiga la yeelanayo qiimeyn?

J. Xaaladaha badankooda, takhasuslahaaga shaqaalaha bulshada ama maamulaka kiiska wuxuu kuu soo dirayaa waraaq ballan. Haddii aadan awoodin in aad imaato xafiiska, waxay awoodi karaan in ay kugula kulmaan gurigaaga ama waxay qiimeynta ku dhammeyn karaa telefoonka. Kala xiriir takhasuslaha shaqaalahaaga bulshada macluumaad badan ee ku saabsan ikhtiyaaradan.



Maamulka Kiiska ee WorkFirst _____

Telefoon _____

Shaqaalaha Bulshada ee WorkFirst _____

Telefoon _____



Uurka ilaa Tubta Shaqaaleynta



Waa maxay waxaan filan karo marka aan ahayn qayb ka mid ah Uurka ilaa Tubta Shaqaaleynta?



Kumaa qayb ka ah Tubta Uurka ilaa Shaqaaleynta?

Waxaad qayb ka tahay Tubta Uurka ilaa Shaqaaleynta haddii aad hesho gargaarka kaashka ee TANF (Gargaarka Aan Joogtada Ahayn ee Qoysaska Baahan) oo aadna leedahay uur ama daryeelayso dhallaan ka yar 12 bilood.

Waa maxay yoolalka Uurka ilaa Tubta Shaqaaleynta?

Dhisidda Qoysas Caafimaadqaba

In lagu caawiyo qoysaska in ay ka qaybgalaan hawlaha WorkFirst iyaga oo lagu caawinaya in ay ka soo baxaan caafimaadka iyo baahiyada kale ee qoyska.

In lagu caawiyo qoysaska in ay noqdana kuwo isku filan

Waxaa ka jira dhawr tallaabo Uurka ilaa Tubta Shaqaaleynta. Waxaad dulmari kartaa dhammaan ama kaliya qaar iyaga ka mid ah. Waxay ku xirnaansaa marxaladda uurka ee aad ku jirto.

Haddii aad ku cusub tahay barnaamijka TANF, tallaabadaada koowaad waxay noqonaysaa **hannaanka qiimeynta ee dhammeystiran**.

Qiimeynta Uurka ilaa Shaqaaleyn

Tallaabadaada xigta waa in laga qaybgalo oo la dhammeystiro qiimeynta Uurka ilaa Shaqaaleynta ee takhasuslaha shaqaalaha bulshada ee WorkFirst.

Qiimeynta waxay:

- Aqoonsaneysaa baahiyada qoyskaaga, awoodaha iyo caqabadaha suurtagalka ah
- Aqoonsaneysaa adeegyada laga yaabo in aad u-qalanto inta aad ku jirto Tubta Uurka ilaa Shaqaaleynta
- Go'aamiso ka-qaybgalka aad u baahan tahay iyo in aad aqoonsato hawlaha WorkFirst ee habboon



Ka-qaybgalka WorkFirst ee saddex biloodlaha koowaa iyo labaad

Haddii aad ku jirto saddex biloodlahaaga koowaad ama labaad (saddex ilaa lix bilood) ee uurka, waxaa lagaa doonayaa in aad ka qaybgasho waqti buuxa ama si ku dhow waqti buuxa hawlaha

WorkFirst. Ka-qaybgalka waqtiga buuxa waa 32-40 saacadood toddobaad kasta.

Natiijooyinka qiimeynta dhammeystiran iyo qiimeynta Uurka ilaa Shaqaaleyn waxay go'aaminayaan inta ay tahay in aad ka qaybgasho.

Ka-qaybgalka WorkFirst ee saddex-biloodlaha saddexaad

Iyada oo lagu saleynayo natiijooyinka qiimeyntaada, waxaanu go'aaminaynaa haddii aad tahay:

- Qof iskiisa ugu qaybgala WorkFirst ama
- Qof ku waajibta in uu ka qaybgalo WorkFirst ama
- U-qalma in uu doorto in aanu ka-qaybgalin hawlaha WorkFirst.



Ka-qaybgalka WorkFirst ee waalidiinta haysta carruurta min dhalashada ilaa 12 bilood jir

Kadib marka ilmahaaga uu dhasho, waa in aad dhammeystirto qiimeyngta Uurka ilaa Shaqaaleynta.

Qiimeyntan waxay go'aaminaysaa heerkaaga ka-qaybgalka WorkFirst. Waxaa laga yaabaa in:

- Laguu tixgeliyo sida qof iskiisa ugu qaybgala WorkFirst
- Laguu tixgeliyo sida qof iskiisa ugu qaybgala WorkFirst
- Aad awooddo in aad xulato ka-reebnaanta ilmaha yar (waxaad ka faa'iideysan kartaa ka-reebnaantan ilaa 365 maalmood, ama 12 bilood ee muddada noloshada ah, kahor maalinta dhalashada koowaad ee dhallaankaaga ama carruurtaada.)

Haddii aad u-qalanto ka-reebnaanta ilmaha yar, waxaad xulan kartaa in aadan ka qaybgalin hawlaha WorkFirst. Si aad ugu qalanto, waa in aad ka qaybgasho qiimeynta loo baahan yahay.

WAC 388-310-1450

Waxaad wajihi kartaa ciqaabo cunaqabateyn xilliga qayb kasta ee uurkaaga ama kadib marka ilmahaaga uu dhasho haddii aadan ka qaybgalin dhammaan qiimeyngta Uurka ilaa Shaqaaleynta ee loo baahan yahay ama haddii qiimeyngadas ay go'aamiyaan in aad tahay ka-qaybgale waajib ah ee hawlaha WorkFirst oo aadan ka qaybgalin.

Yoolkeenna waa in la dhiso qoysas caafimaadqaba, ma aha in aan cunaqabateyno, balse waaqaadato qaybtaada oo aad uga qaybgasho Tubta Uurka ilaa Shaqaaleynta sida loo baahan yahay.